

**Branch Offices:**

1700 - 155 Carlton St.  
Winnipeg MB R3C 3H8  
Tel. 204-945-2476  
Tel. lacag la'aanta:  
1-800-782-8403  
Faks: 204-945-6273  
E-mail: rtb@gov.mb.ca

143-340 9<sup>th</sup> Street  
Brandon MB R7A 6C2  
Tel. 204-726-6230  
Tel. lacag la'aanta:  
1-800-656-8481  
Faks: 204-726-6589  
E-mail:  
rtbbrandon@gov.mb.ca

113-59 Elizabeth Dr.  
Thompson MB R8N 1X4  
Tel. 204-677-6496  
Tel. lacag la'aanta:  
1-800-229-0639  
Faks : 204-677-6415  
E-mail:  
rtbthompson@gov.mb.ca

## The Residential Tenancies Branch Laanta Kirada Deegaanka

### WARQADDA XAQIIQADA

#### Mas'uuliyada Saaran Milkiilaha Hantida iyo Kiraystaha

##### Milkiilaha hantida waa in uu:

- unugga la kiraysto u diyaariyo kiraystaha taariikhda kiraystaha soo guuri doono.
- resiid qoran bixiyo marka kirada lagu bixiyo lacagta caddaanka (kaarka lacagta ku jirto xisaabta bangiga ama lacagaha horay loola soo bixi karo waxaa loo haystaa in ay ka mid yahiin lacagaha caddaanka); resiidka waa in uu muujiyo xisaabta kirada la qaaday, taariikhda la qaaday iyo cinwaanka unugga la kiraystay iyo dhismaha la daggan yahay;
- xajiyo muuqaalka unuga la kiraysto, kuna haayo xaalad ku habboon iyada oo la tixgelinaayo muddada kirada;
- dayactiro unugga kuna haayo xaalad wanaagsan;
- hubsado bixinta adeegyada lagama maarmaanka ah sida kuleylka, gaaska, korontada, biyaha kulul iyo qabow ama danabka dadweynaha kale ee milkiilaha laga rabo in uu bixiyo;
- uusan faragelinin bixinta adeegyada lagama maarmaanka ah;
- kiraystaha ama xubin ka tirsan reerka kiraystaha u ogolaado in uu ku raaxeysto isticmaalka unuga kirada iyo dhismaha la daggan yahay xagga dhamaan ujeedooyinka caadiga ah;
- baaro ashtakooyinka ku saabsan rabshada ama khatarta amaanka sida ugu dhaqsiiyaha badan ee suurogalka ah, iskuna dayyo in uu xalliyo dhibaataada;
- bixiyo iyo suurogeliyo albaabo iyo qufulo ku filan si loo sugo amaanka unugga la daggo.

(fiiri bogga xiga)

## **Kiraystaha waa in uu:**

- kirada ku bixiyo waqtigii loo qabtay;
- dhowro nadaafadda unugga kirada iyo dhismaha;
- dib u qurxiyo unugga kirada ama dhismaha la dago marka uu ogolaasho ka helo milkiilaha hantida oo keliya;
- si macquul ah uga taxadiro in uusan burbur u geeysanin unugga kirada iyo dhismaha la daggan yahay, iyo haddii burbur loo geeysto, in sii wanaagsan loo dayactiro muddo macquul ah gudaheeda;
- Uusan rabsho u geeysanin dadka kale ee ku sugan dhismaha la daggan yahay ama hantida deriska;
- uusan khatar gelinin amaanka dadka kale ee ku sugan dhismaha;
- hubsado in dadka ay soo geliyaan unugga kirada ama dhismaha la daggan yahay aysan sababin burbur ama aysan rabsho u geeysanin ama aysan khatar gelinin amaanka dadka kale;
- u hoggaansamo sharciyada iyo xeerka macquulka ah ee milkiilaha;
- milkiilaha ogeysiyo dayactirka loo baahan yahay.

## **Si aad u heshid macluumaad badan**

Warqadaan xaqiiqada waa sharaxaad gaaban oo keliya. Si aad u heshid macluumaad badan la xariir:

### **Laanta Kirada Deegaanka**